

Sideen u dhaqmayaa, haddii qoyskeyga cid ka mid ah uu taabtey koronuhu oo lagu amrey in uu karantiin galo?

- Qofka karantiinka lagu amrey wuxuu u dhawaadey qof koronuhu ku dhacay wuuna qaadi karaa cudurkaa.
- Karantiinka qofka la galiyey dadka guriga kula nooli iyagu kuma jiraan karantiin (haddii uunan si kale u taabanin korona feyrasku).
- Karantiinka cida lagu amrey wuu caafimaad qabaa, laakiin waxaa laga yaabaa inuu gadaal uga jirado koronaha. Xaaladiisa caafimaad ayaa lala soconayaa haddii uu calaamado yeeshana wuxuu tagayaa baadhitaanka koronaha.
- Haddii shaqsiga lagu amrey karantiinku uu yeesho calaamado, qoyska intiisa kalena waxay galayaan karantiin ay iskood isku galinayaan. Qofka calaamadaha leh, ee karantiinka ku amranaa wuxuu tagayaa baadhitaanka koronaha.
 - haddii baadhitaanka koronaha natiijadiisu ay noqoto bosatif, dhakhtarka cudurada faafa qaabilsan ayaa ku amraya qoyska oo dhan in ay galaan karantiin qofka jirana waxaa lagu xadeynayaa gurigga.
 - haddii ay natiijada baadhitaanka koronuhu noqoto negatíf, qoyska intiisa kale karantiinka ay iskood isku galiyeen wey joojinayaan ama ka baxayaan

Wixii warbixin dheeraad ah ee mowduuca la xidhiidha:

www.turku.fi/korona

www.turku.fi/se/corona

www.turku.fi/en/corona (included Google Translator)